Taageerada dhibaatooyinka Rinkeby juunyo 2020

iyo xiriiryo heer sare ah oo loola xiriiri karo

la cusboonisiiyay 24 juunyo

Markii taariikhda ay ku beegnayd talaado 16 juunyo, wuxuu maamulka xaafadda firfircoon geliyay taageerada dhibaatada, taasoo dhacday kaddib markii nin 66 sano jir ah oo ka tirsan/xubin ka ah ururrada xaafadda Rinkeby, la shaacbixiyay in uu carruur u geystay xadgudub jinsi ku salaysan.

Tallaabo ka qaadida gaarka ahayd ee ku salaysanayd taageerada dhibaatada waa la gabagabeeyay, laakin kooxaha loo yaqaanno [medborgarvärdar] iyo kooxaha loo yaqaanno [fältassistenter] ayaa goobaha ka muuqda, waxayna ka jawaabaan su`aalaha xiriir la leh haddii qof fal xun loo geystay, ama u garanayo qof fal noocaas ah loo geystay ama uu ka walwalsan yahay dhacdada noocaas ah.

La taliyeyaasha waalidiinta ee ka hawlgala Xarunta qoysaska [Familjehuset] ee xaafadaha Rinkeby iyo Husby, waxaa isniin-jimce saacadaha 8.00-16.00 laga helaa taageero iyo hagid ku salaysan khadka taleefanka: 08-508 01 119. Saacadaha xafiiska u xiran yahay iyo sabti/axad/maalin fasax ah waxaa loola xiriira Maamulka xaaladaha arrimaha bulshada ee degdegga [socialjouren] 08-508 40 000.

Ma ka walwalsan tahay dhacdoonada u ubadkaaga la kulmay?

- **Wargelinta ciidanka booliska** Haddii aad u maleeyso in ubadkaaga fal- danbiyeed loo geystay, sida xaaladaan oo kale oo xadgudub jinsiga la xiriira, wac ciidanka booliska 114 14 (Haddii nafta ay halis ku jirto waa inaad mar kasta wacda 112).

- **Xarunta qoysaska [Familjehuset]** waxaa laga heli karaa taageero iyo hagid, ka wac 08 508 01 119 isniin-jimce 8-16. Saacadaha xafiiska u xiran yahay iyo sabti/axad/maalin fasax ah la xiriir **Maamulka xaaladaha arrimaha bulshada ee degdegga [socialjouren]** 08 508 40 000.

- **Maamulka adeegga bulshada [Socialtjänsten]** Haddii aad ka walwalsan tahay xaaladda qof carruur ah waxaad la xiriiri kartaa waaxda qaabilaadda ilmaha iyo dhallinyarada ee Maamulka adeegga bulshada, taleefan 508 01 968.

- **Rugta daryeel-caafimaadeedka dhallinyarada [Ungdomsmottagningen]** ee loogu talagalay dhallinyarada aan weli 23 sano buuxsan. Haddii aad ka walwalsan tahay ama u baahan tahay inaad qof la hadasho waxaad wici kartaa Rugta daryeel-caafimaadeedka dhallinyarada [Ungdomsmottagningen] isniin-jimce saacadaha 8-16. Taleefan:08 123 36020.

- **Kooxaha loo yaqaanno [Fältassistenter]** Haddii aad ka walwalsan tahay ama u baahan tahay qof kala hadasho arrin ku qabsatay waxaad isniin-jimce 9-17 wici kartaa labarkaan 08 508 010 89.

Goobaha kale ee jawaab iyo caawinaad laga heli karo

Kalkaalisada caafimaadka ee rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta, waxaa la waydiin karaa su`aallo ku saabsan horumarka iyo caafimaadka ilmaha.

BVC Rinkeby, 08-123 399 08, **BVC Kista**, 08-123 409 40.

Daryeel-caafimaadeedka nafsiga ee hore [Primärvårdens psykiatri] Waxaa laga hela talo-siin iyo daryeelid loogu talagalay ilmaha iyo dhallinyarada aan weli 18 sano buuxsan, kuwaasoo muujiya caafimaad-darrada dhinaca nafsiga.

Waxaa kamid ah **Kista BUMM,** 08-650 16 16, iyo **Anwar BUMM** Kista 08-121 495 08.

Daryeel-caafimaadeedka nafsiga [Prima Järva], 08-410 60 710. Rugta daryeel-caafimaadeedka nafsiga ilmaha iyo dhallinyarada, laga helo daryeel-caafimaadeedka iyo daryeelid heer khabiir ah.

Arrimaha xaaladaha degdegga ee dhallinyarada [Ungdomsjouren] Hawlgalladooda waxay ku salaysan yihiin wacyigelin, Järva waxayna xoog saaraan xaaladd axaafadda Rinkeby, jimce iyo sabti saacadaha 14-24, axad saacadaha 14-20. Arrimaha xaaladaha degdegga ee dhallinyarada [Ungdomsjouren] Järva waxaa lagala xiriiri karaa 08-508 43 680.

Xarunta taageerada [stödcentrum] waxaa loogu talagalay dhallinyarada loo geystay fal-danbiyeed ama goob-joog ahaa goob u falka noocaas ah ka dhacay. Dhallinyarada iyo waalidiinyta waxay heli karaan taageero ku salaysan wadahadal, talo-siin iyo caawinaad wax ku ool ah. Xiriir: 08-508 48 015, stodcentrum.nord@stockholm.se

Lambarka taleefanka ee xaaladaha degdegga ee Ururka xuquuqda ilmaha ay bulshada ku leeyihiin [Bris]: 116 111. Saacadaha taleefan-dirida waa isniin-jimce 9-12 iyo 14-21. Sabti -axad saacadaha 14-21.

Lambarka taleefanka ee Ururka xuquuqda ilmaha ay bulshada ku leeyihiin [Bris] ee dadka waawayn loogu talagalay: 077-150 50 50. Saacadaha taleefan-dirida waa isniin-jimce saacadaha 9-12.

Markii qof carruur aad ahayd ma lagu gestay fal xadgudub ku salaysan?

- **Wargelinta ciidanka booliska** Haddii danbifal lagu geystay, sida xadgudub jinsiga la xiriira, wac ciidanka booliska 114 14 (Haddii nafta ay halis ku jirto waa inaad mar kasta wacda 112). Waa muhim in sida ugu dhaqsida badan dhacdada xadgudubka la wargeliyo ciidanka booliska, laakin xitaa haddii muddo dheer goorta dhacdada ka soo wareegato waxaa suurtagal ah in ciidanka booliska dhacdada la wargeliyo.

- **Rugta daryeel-caafimaadeedka dhallinyarada [Ungdomsmottagningen]** ee loogu talagalay dhallinyarada aan weli 23 sano buuxsan. Haddii aad ka walwalsan tahay ama u baahan tahay inaad qof la hadasho waxaad wici kartaa rugta daryeel-caafimaadeedka dhallinyarada [Ungdomsmottagningen] isniin-jimce saacadaha 8-16. Taleefan:08 123 36020.

- **Marna ha is oran raadsashada daryeel-caafimaadeedka waan ka habsaamay**. Waa hagaag inaad dib u dhigato xiriir la yeelashada xarumaha daryeel-caafimaadeedka, xitaa haddii muddo dheer ay ka soo wareegatay tan iyo markii falka xadgudubka lagu geystay. Marna lama oran karo muddo dheer ayaa ka soo wareegay goortii aan dib eegi lahaa dhacdadii xiriirka la lahayd faldanbiyeedka ku salaysna jinsiga. Dadyowga badidooda way doonayaan ama ma doonayaan in caawinaad ay raadsadaan, oo ay ka sheekeeyaan danbifalka jinsiga ku salaysna ee loo geystay, xitaa haddii xadgudub u saamayn xun noolashooda ku yeeshay. Sidaas awgeed, waa arrin muhim ah in caawinaad la raadsado haddii dareenkaaga u noqdo in xadgudubku u saamayn ku yeeshay noolashaada ama noolol-maalmeedkaaga.

- **La xiriir xarumaha daryeel-caafimaadeedka [husläkarmottagning]** caawinaad loogu talagalay dadka waawayn oo u baahan caawinaad iyo daryeelid xiriir la leh xadgudub dhinaca jinsiga, dhacdhadaas oo dhacday markii aad carruur ahayd. Haddii la shaacbixiyo in dhibaatada ay tahay mid aad u wayn xarumaha daryeel-caafimaadeedka [husläkarmottagning] –qiimaynta xirfadeed kaddib waxaa – lagu gudbinayaa daryeel-caafimaadeedka qof khabiir ah. Faahfaahinta xiriirka ee xarumaha daryeel-caafimaadeedka [husläkarmottagning] waxaa laga helaa barta internetka internetka 117.se

- **Barta internetka ee Gobolka 1177.se** waxaa laga aqrisan karaa warbixin dheeraad, waxaana laga heli karaa isku-xireyaasha ururrada laga heli karo taageero ee loogu talagalay qofka adigoo kale ah ee faldanbi loo geystay.

  https://www.1177.se/Stockholm/liv--halsa/overgrepp-och-sexuella-trakasserier/valdtakt-sexuella-overgrepp-och-andra-sexualbrott/

Stockholms stad